

Diiwaanka Daryeelka ee La Wadaago ee Birmingham iyo Solihull

Diiwaanka caafimaadka iyo daryeelka
elektarooniga ah ee qarsoodida ah ee
dadka ku nool Birmingham iyo Solihull



Waa maxay Diiwaanka Daryeelka ee La Wadaago ee Birmingham iyo Solihull?

Diiwaanka Daryeelka ee La Wadaago waa qaab la isugu geynayo diiwaannadaada gaarka ah oo dhan ee laga helo hay'adaha kala duwan ee ku lugta leh daryeelkaaga caafimaad iyo bulsheed. Waa qarsoodi wuuna ka duwan yahay wax kasta oo laga yaabo inaad horay u maqashay.

Wuxuu u oggolaan doonaa xirfadlayaasha caafimaadka iyo daryeelka bulshada inay arkaan macluumaadka khuseeya daryeelka iyo daaweynta aad ka heshay adeegyada oo dhan.

Waan ognahay inaad rabto inaad sheegto sheekadaada oo aad wadaagto macluumaadka hal mar marka aad daryeel ka heleyso hay'ad kasta oo caafimaad ama bulsheed oo ka jirta guud ahaan Birmingham iyo Solihull. Taasi waa sababta aan u samaynay Diiwaanka Daryeelka ee La Wadaago.

Yay tani saamaynaysaa?

Qof kasta oo u diiwaangashan Dhakhaatiirta Guud (GP) ee Birmingham iyo Solihull, Coventry iyo Warwickshire, ama Herefordshire iyo Worcestershire waa lagu dari doonaa.

Haddii aad ka diiwaangashan tahay xarun ka baxsan aaggan, waxaad u baahan doontaa inaad la xiriirto Dhakhtarkaaga Guud (GP) si aad u ogaato in lagugu daray barnaamij kale.



Yaa arki doona macluumaadkaaga - oo maxaa?

Xirfadlayaasha caafimaadka iyo daryeelka bulsheed waxay awoodi doonaan inay arkaan diiwaannadaada iyagoo u marayo Diiwaanka Daryeelka ee La Wadaago ee Birmingham iyo Solihull. In hal meel laga heli karo macluumaadkaaga oo dhan ayaa ka caawin doonta inay ku siiyaan daryeel wanaagsan oo ammaan ah.

Qaar ka mid ah shaqaalahooda maamulka iyo xoghaynta ayaa sidoo kale laga yaabaa inay awooddaan inay arkaan macluumaadka si ay u taageeraan xirfadlayaasha. Tusaale ayaa ah in lagu soo diro warqadda ballanta.

Shaqaalaha oo dhan waa inay raacaan sharciga ka dhigaya macluumaadkaaga mid qarsoodi ah. Mar kasta oo ay eegaan diiwaannadaada waa la qori doonaa si loo hubiyo inay kaliya u eegayaan macluumaadka saxda ah, sababo sax ah dartood.

Waa kuwee ururrada ku lugta leh?

Hay'adaha hadda barnaamijka ka qaybqaadanaya ayaa kala ah.

- GP practices in Birmingham and Solihull
- Birmingham and Solihull Mental Health NHS Foundation Trust
- University Hospitals Birmingham NHS Foundation Trust
- Birmingham Women's and Children's NHS Foundation Trust (including Forward Thinking Birmingham)
- Birmingham Community Healthcare NHS Foundation Trust
- The Royal Orthopaedic Hospital NHS Foundation Trust
- Birmingham City Council
- Solihull Metropolitan Borough Council
- Birmingham Children's Trust
- West Midlands Ambulance Service University NHS Foundation Trust

Hay'adaha caafimaadka iyo daryeelka bulshada ee xaafadaha deriska la ah Coventry iyo Warwickshire iyo Herefordshire iyo Worcestershire waxay sidoo kale awoodi doonaan inay arkaan macluumaadkaaga hadduu lagama maarmaan u yahay daryeelka aad halkaas ka hesho.

Maxay awoodi doonaan inay arkaan?

Wejiga koowaad ee Diiwaanka Daryeelka ee La Wadaago wuxuu u oggolaan doonaa xirfadlayaasha caafimaadka iyo daryeelka bulshada inay arkaan tafaasiisha habboon ee ku jira:

- diiwaanka caafimaadkaaga ee Dhakhtarka Guud (GP)
- macluumaadka laga helo daryeelka kale, oo ay ku jiraan isbitaallada, adeegyada caafimaadka maskaxda iyo adeegyada bulshada
- diiwaanada dhalmada.

Inay awood u lahaadaan inay arkaan macluumaadkan waxay ka caawin doontaa inay kuu siiyaan daryeelka ugu fiican sida ugu dhaqsaha badan adigoo aan ka wicin telefoonka ama sugin ururrada kale inay u gudbiyaan tafaasiisha.

Waxaan isku keeni doonaa macluumaadka laga helo Dhakhaatiirta Guud (GPs) waxaana u oggolaan doonaa inay arkaan xirfadlayaasha caafimaadka ee ku sugan isbitaallada, oo ay ku jiraan Waaxaha Gurmada. Waxaan sidoo kale ku biirin doonaa macluumaadka laga helo bulshada iyo daryeelka bulshada, ambalaasta iyo adeegyada NHS 111.

Waxaan sii wadi doonaa samaynta Diiwaanka Daryeelka ee La Wadaago, taasoo u oggolaanaysa xirfadlayaasha oo dhan ee ku sugan goobo badan oo caafimaadka iyo daryeelka bulshada inay arkaan macluumaadka si loo taageero daryeelkaaga. Waxaan sidoo kale ka caawin doonaa adeegyada inay fahmaan oo ogaadaan qaababka ugu wanaagsan ee loo dabooli karo baahiyaha daryeel ee dadka.

Waxaa jira sharciyo adag oo ku xeeran sida aan u isticmaalno macluumaadkaaga. Waxaan hubin doonaa in loo maareeyay oo loo eegay si ku habboon oo waafaqsan shuruudaha sharciyeed oo dhan, oo ay ku jiraan sharciga ilaalinta xogta ee Boqortooyada Ingiriiska (UK) (DPA 2018 iyo sharciga beddelka u ah). Kormeerada rasmiga ah, ama xisaab-xirada, ayaa hubin doona inay sidan tahay arrinta.



Maxay tani muhiim u tahay

Xirfadlayaasha caafimaadka iyo daryeelka waxay awoodi doonaan inay ka arkaan macluumaadka habboon diiwaannadaada.


Tani waxay ka dhigan tahay:

- inaad ku celcelin doonin tafaasiishaada mar kasta oo aad u baahan tahay daryeel
- daaweyn fiican oo, suurtoagal ah, degdeg ah maadaama xirfadlayaasha ku daryeelaya ay awood u yeelan doonaan inay si dhakhso ah u arkaan diiwaannadaada
- inaad taageeradaada daryeelka bulshada u sharrixi doonin xirfadlayaasha caafimaadka
- daaweyayaasha ayaa awood u lahaan doonaan inay arkaan daawooyinka aad qaadanayso, daawooyinka horaan aad qaadatay, iyo inaad qabto wax xasaasiyado ah – taasoo ka dhigaysa daawayntaada mid ammaan badan.

Waxay sidoo kale ka dhigi doontaa daaweynta mid waxtar badan u leh qof kasta oo u baahan daryeelka loogu talagalay COVID-19, mahad ha u sugnaatee helitaanka degdega ah ee macluumaadka ku saabsan xaalad kasta oo horay u jirtay oo laga yaabo inay qabeen iyo daawooyinkooda.


MAXAA DHACAYA MARKA XIGA?

Isbeddelku si toos ah ayuu u dhacayaa marka aan hadda u wareegno Diiwaanka Daryeelka ee La Wadaago ee dhammaan hay'adaha ka qayb qaadanaya barnaamijka.





Haddii aadan ka helin fikradda



Waxaad xaq u leedahay inaad diido wakhti kasta – adiga ayaa go'aanka iska leh.

Balse fadlan si taxaddar leh uga fikir intaadan tani samaynin. Diidmada waxay ka dhigantahay in adeegyada ku siinaya daryeelka in ay awoodi waayaan inay arkaan diiwaannadaada laga helo adeegyada kale.

Taasi waxay la macno noqon kartaa macluumaadka muhiimka kuu noqon kara markaad u baahan tahay taageero caafimaad ama bulsheed – tusaale ahaan, marka aad booqanayso Waaxda Gurmada Degdega ah ee isbitaalka – ayaa laga yaabaa inaan isla markaaba gacanta ugu jirin sababtaas awgeed.

Haddii aad rabto inaad diido, waad na ogeysiin kartaa iyadoo loo marayo mareegteena ku jirta cinwaanka hoose. Haddii aad u baahan tahay caawimaad, fadlan u dir iimayl collaborative.care.record@nhs.net ama wac **0345 6461163**.

Ma rabtaa inaad wax badan ogaato?

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Diiwaanka Daryeelka ee La Wadaago iyo wuxuu adiga kaaga dhigan yahay:



www.livehealthylivehappy.org.uk/birmingham-and-solihull-shared-care-record/



collaborative.care.record@nhs.net

Haddii aad jeclaan lahayd inaad ku hesho macluumaadkan qaab kale (tusaale ahaan, farta indhoolaha, maqal, bandhig qoraaleed ama luuqad aad ku hadasho) fadlan kala xiriir xubin ka tirsan kooxdayada cinwaanka iimaylka ee sare.

Xirfadlayaasha iyo asxaabta taageerta ee leh awoodda ay ku eegaan diiwaannada daryeelka bulshada iyo caafimaadka waxay ku shaqeeyaan xeerar anshax oo adag, taasoo la macno ah inay ixtiraamaan asturnaantaada oo macluumaadkaaga xafidaan. Ku-guuldareysiga in sidaas la sameeyo waa dembi culus. Macluumaadkaaga oo dhan ee la heli karo iyadoo loo marayo Diiwaanka Daryeelka ee La Wadaago waxay ku xiran yihiin sharciga ilaalinta xogta ee Boqortooyada Ingiriiska (UK) (DPA 2018 iyo sharciga beddelka u ah).

I iskaan garee si laguugu hago mareegteena 

